



European Union Naval Force Somalia  
Operation Atalanta  
[www.eunavfor.eu](http://www.eunavfor.eu)

## **Markabka dagaalka ee ESPS Relampago oo ay leeyihiin Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ayaa galbiyay doon ganacsi oo u rarnayd Barnaamijka Cunada Aduunka**

---

Markabka dagaalka ee ESPS Relampago oo laga leeyahay Isbayn kaas oo qay ka ah Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee hawlgalka la tacaalida budhcad-badeeda ee Atalanta ayaa xaqiijiyay in markabka Barnaamijka Cunada aduunka oo lagu magacaabo MV Masar Trade uu si nabada ku gaadho Muqdisho.

ESPS Relampago waxa uu galbiyay markabka MV Masar Trade oo dadka Soomaaliyeed u waday Sabuul/Gallay ay aad ugu baahnaayeen kaas oo ka soo kicitimay dekada Boosaaso ee xeebta bariga Afrika una jeeday Muqdisho.

Inti lagu guda jiray galbinta, markabka ESPS Relampago waxa uu il gaara ku hayay doontan ganacsi iyadoo xaqiijinaysay in ay ka badbaado weerar ay suurawdo xili kasta inay budhcad-badeedu ku qaado. Markii ay doonta Barnaamijka Cunada Aduunku si nabada ku gaadhay dekada, markabka Ciidamada Bada ee Midawga Yurub waxa uu sii waday ilaaladiisii budhcad-badeeda biyaha xeebta Soomaaliya.